# Kaalmada Maaliyadeed ee PeaceHealth

## Caawimaad ayaa la heli karaa

PeaceHealth waxay ka go'an inay hubiso in bukaanadeennu inay helaan daryeelka ay u baahan yihiin, hadii ay awoodaan inay bixiyaan iyo hadii kaleba. Bixinta daryeel caafimaad dadka aan awoodin inay bixiyaan waa qayb kamid ah himiladeena. Isbitaaladeena waxaa sharci ahaan looga baahan yahay inay bixiyaan daryeel lacag la'aan ah iyo daryeel qiimo dhimis lagu sameeyay bukaanada u qalma. Waxaad u qalmi kartaa daryeel lacag la'aan ah ama qiimaha la dhimay iyadoo lagu saleynayo tirada qoyska iyo dakhliga, xitaa haddii aad leedahay caymis caafimaad. Bukaanada dhibka kala kulma bixinta biilka waa inay wacaan Takhasuslaha Koontada Bukaanka lambarada hoos ku qoran.

## Sida loo Codsado

Qof ahaan, boostada ama talefoon ahaan. Bukaanku wuxuu codsan karaa kaalmo dhaqaale isagoo soo gudbinaya codsi iyo soona gudbinaya dukumentiyo ka caawinaya in la aqbalo arjigiisa. Fadlan nala soo xiriir haddii aad qabtid su'aalo, ama si aad u codsato nuqulo lacag la'aan ah oo foomka codsiga iyo xeerarka.

- **Telefoon ahaan**:
  - 877-202-3597 Taageerada Ingiriisiga
  - 844-746-4737 Dhamaan luuqadaha kale [Para español o tagalog, 国语, для русского языка, cho Việt]
- **Websaytka PeaceHealth:** **peacehealth.org/financialassistance**
- Shakhsi ahaan: Xarun kasta oo kamid ah xarumahayaga PeaceHealth Medical Centers
- **Si aad dukumentiyada ugu hesho boostada lacag la'aan:** Naga soo wac lambarada kor ku qoran

## Xaqiiqooyin Degdeg ah oo ku saabsan Kaalmada Dhaqaale

**Daryeel Degdega ah:** Qolalka gurmadka xaaladaha degdega ah ee dhammaan isbitaalladeennu waxay raacaan xeerarka sharciga ah ee Xeerka Daaweynta Caafimaadka Degdegga ah iyo Shaqada (Emergency Medical Treatment and Labor Act, EMTALA). Waxaan daryeelnaa bukaanada qaba baahiyaha caafimaad ee degdega ah, ha ahaado bukaanku caymis leh iyo mid aan lahaynba, iyada oo aan loo baahnayn lacag bixinta wakhtiga adeega. Kaalmo dhaqaale ayaa la heli karaa haddii loo baahdo daryeelka degdegga ah.

**Maxaan sameeyaa haddii aanan bixin karin biilashayda?** Bukaan kasta ayaa codsan karaa kaalmo dhaqaale. Qof kasta oo codsada waxaa laga codsan doonaa macluumaad cadaynaya baahidiisa dhaqaale. PeaceHealth waxay bixisaa caawimaad ku saabsan biilkaaga iyadoo lagu salaynayo dakhligaaga iyo awooddaada inaad bixiso. Waxaan bixinaynaa qiimo dhimis u dhaxaysa 70% ilaa 100%. Qadarka taageerada la heli karo waxay ku xiran tahay baahiyaha dhaqaale ee bukaanka.

**Maxay daboolaysaa?** Bukaanka loo ogolaaday kaalmada dhaqaale waxaa lagu dabooli doonaa daaweynta degdegga ah ama tan caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah, mana laga qaadi doono wax ka badan lacagta guud ahaan biilka (AGB) bukaanada haysta caymiska.

**Lacag ma bixin karaa?** PeaceHealth waxay codsanaysaa lacag bixin buuxda marka aad hesho warbixinta biilashaada bilowga ah. Haraaga waxaa lagu bixin karaa siyaabo badan, sida: kaarka deynta, kaarka horay loo bixiyay, lacag caddaan ah, jeeg, ama ku bixinta onlaynka. Qorshayaasha lacag bixinta ayaa sidoo kale la heli karaa. Fadlan wac lambarada kore si aad ugala hadasho fursadaha lacag bixinta Takhasuslaha Koontada Bukaanka.

**Kaalmada caymiska:** Waxaan ka caawin karnaa bukaanada inay codsadaan barnaamijyo bulsho ama dawladeed oo laga yaabo inay kaa caawiyaan daboolitaanka biilasha caafimaadka. Bukaanada aan haysan caymis way nala soo xiriiri karaan si ay u helaan caawimaad. Waxaan caawin doonnaa bukaanada leh biil badan xitaa kadib marka caymisku lacag ka bixiyo.

**Haddii Af-Ingiriiska uusan ahayn luuqadaada koowaad:** Xeerkayaga kaalmada dhaqaale, codsi, iyo soo koobitaan waxaa laga heli karaa luqadaha soo socda:

- Af-Isbaanish (Español)
- Af-Shiinees (中文)
- Af-Soomaali (Soomaalida)
- Af-Yukreyn (Українська)
- Af-Jarmal (Deutsch)
- Af-Carabi (العربية)
- Af-Khmer
- Af-Jabaanees(日本語)
- Af-Thai (ไทย)
- Af-Tagalog
- Af-Kuuriyaan (한국어)
- Af-Romaaniya (Română)
- Af-Farsi
- Af-Punjabi
- Af-Fiitnaamiis (Tiếng Việt)
- Af-Ruush (Русский)
- Af-Chuukese
- Af-Oromo
- Af-Faransiis (Français)

PeaceHealth